

Jawaabta Degmada ee ku aadan Go'aanka DACA

Qoysaska Dugsiyada Dadwaynaha Seattle ee Sharaftale,

Markay taariikhdu ahayd bisha Sept. 5, 2017 wuxuu madaxwayne Trump ku amray Hayada Amaanka iyo dadka soo galaytiga ah ee magaceeda loosoo gaabiyo (USCIS) inay ku soo gabogabayso labo sano iyo badh barnaamijka sharciga lagu siiyo da'yarta ay waalidkood wadankan keeneen ee loo soo gaabiyo (DACA).

Barnaamijka DACA waxaa sharci lagu siiyey ilaa 800,000 oo dhalinyaro ah oo ay waalidkood wadankan kusoo galiyeen si sharci daro ah, si ay uga faa'iidaystaan una helaan fursado ay ku gaadhaan himiladooda.

Waan ognahay in go'aankani uu qoysas iyo arday badan ku beeray walaac iyo cabsi. Dugsiyada Dadwaynaha Seattle oo ay weheliyaan gudoomiyaha gobolka, xeer ilaaliyaha guud ee gobolka, xeer dejinta, golaha degaanka iyo madaxda degmooyinku way kasoo horjeedaan in barnaamijkan DACA la joojiyo. Waxaananu rajaynaynaa in golaha wakiilada dalku ay ka soo saari doonaan natiijo fiican oo degdega.

Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxaa ka go'an inay caruurta waxbaraan tiiyoon loo eegayn diin, midab, jinsiyad, cidday jecelyihiin, wadankay kasoo jeedaan ama inay sharci leeyihiin iyo in kale. Waan qabandoonaa wax kasta oo ardaydu ku horumarayaan, waxaananu kuugu balan qaadaynaa inaanu samayndoona wax kasta oo aan ku siinayno amaan iyo sharaf inta ay dugsiiga joogaan ardaydu.

Si aan u caawino go'aankan, waxaan ku cadaynay jawaabtayada Hayada Xakamaynta Soo Galaytiga ee magaceeda loo soo gaabiyo (ICE) warbixintii kormeeraha guud ee sanadkii hore waanuu la wadaagnay dhamaan shaqaalaha dugsiiga. Qodobada ugu muhiimsani waa:

- Degmadu waligeed ma waydiin doonto mana qoridoonto warbixin ku saabsan sharciga ardayda ama qoyska.
- Hadii sarkaalka ka socda hayada ICE naga codsado warbixin ku saabsan arday ama inay soo galaan dugsi ama xarunta degmada si ay u baadhaan, waxay shaqaaluhu sarkaalka ogaysiin soonaan inuu tago xafiiska lataliyaha sharciga.
- Lataliyaha sharciga ee Dugsiyada Dadwaynaha Seattle ayaa fiirin doona waraaqaha aqoonsiga iyo warqada ogolaanshaha si uu u baadho ka hor intaanu siinin ogolaansho ama diidmo.
- Waxa kale oo aanu la shaqaynaynaa ururka qareenada qoyska iyo xuquuqda soo galaytiga ee magacooda loosoo gaabiyo (NWIRP) si aan caruurta iyo qoysaska ay ardaydoodu dhigtaan Dugsiyada Dadwaynaha Seattle ugu helo cid ka gargaarta adeega la xidhiidha sharciga soo galaytiga. Cidii rabta in laga caawiyo xaga sharcigu waxay kala soo xidhiidhi karaan Kayley Bebbler 206-957-8649 ama kayley@nwirp.org si ay u waraysato.

Waxaan rumaysanahay disdoorka maraykanka iyo fursadaha xoriyada iyo nabadgelyada ee ku cad. Waa inaan dhamaanteen difaacanaa sharciyada oo aan is caawinaa. Waan ku faraxsanahay masuuliyada aad saarteen Dugsiyada Dadwaynaha Seattle, waanan qaban doonaa wax kasta oo aanu u qaban karno xubnaha bulshada dugsiiga oo ay ku jiraan ardayda iyo qoysaska soo galootiga ahi.

Daacadnimo
Dr. Larry Nyland
Kormeeraha Guud ee
Dugsiyada Dadwaynaha Seattle